Utlendingsdirektoratet
Norwegian Directorate
of Immigration

# Lacagta lagu caawiyo dadka ku jira xeryaha qaxootiga

Informasjonsskriv til beboere i asylmottak om stønad – somali versjon

# Innhold

Lacagta lagu caawiyo dadka ku jira xeryaha qaxootiga ........ 3
Lacag ayaad xaq u u leedahay ........ 3
Waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay in lagaa bixiyo waxyaalo intaas ka badan ....... 3
Adiga oo aan codsan ayay xerada qaxootigu kharashka bixinaysaa ........ 3
Kharashaadka soo socda waa in aad codsataa in lagaa bixiyo ........ 4
Qaybta uu qofku iska bixinayo ........ 5
Lacagta waa laguu soo hormarin karaa ........ 5
Xeerar ........ 5

# Lacagta lagu caawiyo dadka ku jira xeryaha qaxootiga

Lacag caawin ah ayaa la siin karaa qofka ku jira xero qaxooti.

Qoraalkan waxaad ku helaysaa warbixin la xiriirta kharashaadka ay kaa bixin karto Hay'adda Agaasinka Ajnebiga (UDI). Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa ku siin kara warbixin intaan ka badan, ayaga ayaana ku caawin kara haddii aad wax su'aalo ah qabto.

## Lacag ayaad xaq u u leedahay

Bishiiba laba jeer ayaa lacag lagu siinayaa (lacagta aasaasiga ah). Lacagta waxaa laguu siinayaa caddaan ama kaar ayaa laguugu shubayaa. Lacagtaan ayaa loo baahan yahay in ay daboosho kharashaadkaaga lagama maarmaanka ah intooda badan.

Caddadka lacagta aasaasiga ah ee lagu siinayo waxay ku xiran tahay

- Nooca xerada qaxootiga ee aad ku jirto:
    - Haddii aad ku jirto xero qaxooti oo aan dadka cuntada loo karinnin, waxaa markaas lagu siinayaa lacag ka badan inta la siiyo dadka ku jira xero qaxooti oo dadka cuntada loo kariyo.
    - Haddii aad ku jirto xero qaxooti oo ku-meelgaar ah ama xero wakhti yar lagu jiro (akuttinnkvartering), waxaa markaas lagu siinayaa lacag ka yar inta la siiyo dadka ku jira xero qaxooti oo caadi ah.
    - Qofka ku jira Xarunta Qaranka ee qaabbilaadda qaxootiga lacag lama siiyo, laakiin waxaa la siiyaa cunto, qalabka nadaafadda, qalabka sariirta lagu goglado iyo dhar ku xiran hadba baahida.
- In aad keligaa tahay iyo in uu qoys kula socdo iyo da'da carruurtaada
- Xaaladda codsigaagii magangelyada
    - Lacag inta kale ka yar ayaa lagu siinayaa haddii codsigaagii diidmo lagaa siiyay amaba la diiday in codsigaaga laga baaraandego, oo ay tahay in aad Norway ka baxdo.
- Haddii aad haysato lacag ama wax qiimo leh. Haddii aad hanti leedahay ama uu dakhli ku soo galo, waxaad taas u sheegaysaa shaqaalaha xerada qaxootiga ee aad ku jirto.

## Waxaa laga yaabaa in aad xaq u leedahay in lagaa bixiyo waxyaalo intaas ka badan

Lacagta aasaasiga ah waxaa loo baahan yahay in ay daboosho kharashaadkaaga lagama maarmaanka ah intooda badan, laakiin waxaa jira kharashaad kale oo aad xaq u leedahay in lagaa bixiyo. Kuwaas oo la yiraahdo caawinta dheeriga ah.

Labo hab ayaad ku heli kartaa caawinta dheeriga ah:

1. Adiga oo aan codsan ayay xerada qaxootigu kharashka bixinaysaa. Shaqaalaha xerada qaxootiga u sheeg in aad u baahan tahay in kharash lagaa bixiyo.
2. Waa in aad UDI ka codsataa in kharashka lagaa bixiyo. Xerada qaxootiga ee aad ku jirto ayaa kaa caawinaysa in aad UDI codsi u dirto. Waa in aad sugtaa jawaabta ah in kharashka lagaa bixinayo iyo in kale.

### Adiga oo aan codsan ayay xerada qaxootigu kharashka bixinaysaa

Dhammaan dadka xeryaha qaxootiga ku jira waa laga bixiyaa

- Kharashka cilminafsi-yaqaanka, dhakhtarka cudurrada maskaxda iyo fiisiyoterabiyada marka ay qayb ka tahay daawaynta maskaxiyanka ah. Daawooyinka iyo safarka lagama maarmaanka ah ee lagu tagayo daaweynta ayaa iyagana sidoo kale layska bixiyaa.
- Qalabka carruurta billaabaya xannaanada carruurta ama dugsiga hoose/dhexe, ilaa iyo caddad go'an
- Kharashka dhalmada ilaa iyo caddad go'an, haddii aadan xaq u lahayn lacagta caawinta ah ee halka mar la baxsho[1]

Qofka ku jira xerada qaabbilaadda (ankomstsenter), xero qaxooti oo ku-meelgaar ah ama xero wakhti yar lagu jiro waxaa laga bixinayaa

- Kharashaadka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah sida kharashka daawooyinka uu dhakhtar qoro, tegidda dhakhtarka ama isbataalka
- Daaweynta ilkaha ee degdegta loogu baahan yahay
- Safarka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah
- Muraayado indho oo diyar ah

Qofka ku jira xerada qaxootiga ee la-qabsashada bulshada (integreringsmottak), waxaa laga bixiyaa

- kharashka kaarka bisha ee gaadiidka dadweynaha si looga qaybqaato hawlaha la-qabsashada bulshada.

## Kharashaadka soo socda waa in aad codsataa in lagaa bixiyo

Qofka ku jira xero qaxooti oo caadi ah waa in uu codsadaa in laga bixiyo kharashaadka ku baxa

- Adeegyada caafimaadka
- Daawooyinka uu dhakhtar qoray
- Kharashka daaweynta ilkaha

Dhammaan dadka ku jira xero qaxooti waxay codsan karaan in laga bixiyo kharashka ku baxa

- Tijaabada aragga iyo muraayadaha indhaha ee dukaanka muraayadaha indhaha ama qalab kale oo aad maalin walba u baahan tahay
- Daaweynta ilkaha ee lagama maarmaanka ah
- Safarka lagama maarmaanka ah
- Dhar iyo qalab dheeraad ah oo loo baahan yahay in ka badan inta caadiga ah
- In laguu gudo wax kaaga gubtay dab ama dhacdooyin kale oo ka dhacay xerada qaxootiga
- Qalabka waxbarashada ee dugsi sare, jaamacad ama machad
- Haddii aad haysato oggolaasho joogitaan oo xaddidan kharashka ku baxaya sidii aad ku keeni lahayd dukumiinti aqoonsi
- aaska

[1] folketrygdloven § 14-17.

### Qaybta uu qofku iska bixinayo

Marka aad ku jirto xero qaxooti oo caadi ah waxaa lagaa rabaa in aad sanadki caddad lacag ah jeebkaaga ka bixiso ka hor inta aan lagaa bixin kharashka ku baxa caafimaadka, daaweynta ilkaha iyo qalabka lagama maarmaanka ah sida muraayadaha indhaha. Taas waxaa la yiraahdaa xadka caddadda lacagta.

Xad caddad lacag ma lihid haddii codsigaagi la soo diiday ama haddii la diiday in codsigaaga laga baaraandego.

## Lacagta waa laguu soo hormarin karaa

Adiga oo aan weli gaarin caddadkii qaybta uu qofku iska bixinayo haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta kharashaad loo baahan yahay in aad bixintooda codsato, waxaad markaas codsan kartaa in qaar lacagta ka mid ah laguu soo hormariyo (hormarinta lacagta aasaasiga ah). Lacag-bixinta xigta ayaa lagugu billaabayaa in la yareeyo intii lagu siin lahaa (lacagta aasaasiga ah ayaa lagaa yaraynayaa). Sidaas ayaadna isaga bixinaysaa lacagtii laguu hormariyay.

In lacag laguu hormariyo ayaad sidoo kale codsan kartaa haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo in aad wax gadato ama aad bixiso kharashaad kale oo muhiim ah oo aan warqaddaan ku qornayn.

## Xeerar

Xaqa aad u leedahay in lacag lagu siiyo marka aad ku jirto xero qaxooti iyo waajibaadka ku saaran waxay ku salaysan yihiin xeer-hoosaadka caawinta dadka ku jira xeryaha qaxootiga. Xeer-hoosaadka waxaad ka helaysaa www.udiregelverk.no. Waxaa kale oo aad halkaas ka helaysaa UDI 2024-002-V1, oo ay ku qoran yihiin heerarka caawinta ee lacagta aasaasiga ah ee markaas jira.